WAAXDA ADEEGYADA ARDAYDA
9361 S. 300 East • Sandy, UT 84070
Taleefonka: 801-826-5021

# Ogolaanshaha Waalidka /Masuulka ee Adeegyada La Talinta

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Ardayga** | | **Taariiqda** | |
| **Waalidka / Masuulka** | | **Fasalka** | |
| **Dugsiga** | | | |

Ansixintaada/ogolaanshahaaga ayaa loo baahanyahay si markaas adeegyada xigga ay ugu bilowdaan ardaygaaga:

☐ Adeegyada caafimaadka hab dhaqanka oo ay ku jiraan; la talin shaqsiga, la talinta kooxeedka iyo dhisida xirfada bulshada/hab dhaqanka. Adeegyadaan waxaa bixiya shaqaalaha La talinta Dugsiga oo lagu qeexay sida La taliyayaasha Dugsiga Shatieysan, Shaqaalaha Bulshada iyo Taqasusyada cilmi nafsiilaha ee gudaha dugsiga canugaaga ama shaqaalaha Waaxda Adeegyada Ardayga ee Dugsiga Degmada Canyons. Haddii adeeg bixiyaha uu helayo kormeerida caafimaadka sida waafaqsan Waaxda Shatiyeynta Xirfadlaha Utah (DOPL), warbixinta waxaa lagu wadaagi karaa baaxada la tashiga.

Ansixintaada/ogolaanshahaaga wuxuu soconayaa hal (1) sanno (365 maalmood) laga bilaabo taariiqda saxiixa illaamaa aad uga noqotid ogolaanshahaaga qoraal ahaan oo ku aadan maamulaha dugsiga ama Degmada, mid walboo soo hormaro.

**WAXYAABAHA SUURTOGALKA AH EE WADA HADALKA**
Waxay ku xirantahay nooca dhibaatada soo bandhigeyso iyo walaacyada la wadaagay inta lagu jiray wareysiga hore ama kulamada la talinta ee ardayga ama waalidka (waaladiinta), sida waafaqsan Xeerka Utah §53E-9-203 shaqaalaha dugsiga degmada ama wakiilada ayaa guud ahaan loo baahanyahay, marka laga reebo dhowr, oo ka mid ah in la helo ogolaanshahaaga waalid ama masuul sharci ahaan si looga hadlo haddii warbixinta laga raadiyo canugaaga ee la xiriirto arimaha xiggo:

a) ka mid ahaanshaha siyaasada ama, marka laga reebo sida lagu sheegay sida waafaqsan Xeerka Utah § 53G-10-202 ama sharciyada Guddiga Waxbarashada Gobolka, falsafada siyaasada)
b) dhibaatooyinka maskaxda ama cilmi nafsiga
c) hab dhaqanka galmada, dooqa, ama dabeecadaha
d) hab dhaqanka sharci darada ah, bulshada lid ku ah, isku cadeynta dambiga, ama yasida
e) qiimaynta muhiimka ah ee shaqsiyaadka ee uu ardayga ama xubnaha qoyska la leeyihiin xiriir qoys oo dhow
f) ka mid ahaanshaha ama aaminaada diinta
g) mudnaanta sida sharciga ah loo aqoonsanyahay iyo xiriirada u dhigma, sida kuwa la jiro qareenada, shaqaalaha caafimaadka, ama wasiirada
h) daqliga, marka laga reebo sida looga baahanyahay sharciga

**ANSIXINTA MUDDADA SUGITAANKA**
Warbixinta la isugu keenay wareysiga waxaa loo isticmaalayaa in lagu aasaaso barnaamij daaweynta. Warbixinta la isu keeno inta lagu jiro xaalada la talinta waxaa lagu dhafayaa barnaamijka daaweynta. Sharciga quseeyo wuxuu u baahanyahay muddo sugitaan labo isbuuc ah ee ka horeyso inta aan ardayga laga wareysan mowduucyadaan, illaamaa uu waalidka ka dhaafo muddada ogeysiintaan. Saxiixaaga wuxuu noo ogolaanayaa inaan ka dhaafno muddada sugitaanka oo aan adeegyo siino canugaaga islamarkiiba.

**SIIDEYNADA LOO BAAHANYAHAY**
Bixiyayaasha adeega ayaa leh masuuliyada lagu hubinayo in maamulaha ku haboon la gaarsiiyo warbixin walba ee quseyso dhibaatooyin imaan karo ama xaalad halis ah ee laga yaabo inay dhacdo. Haddii shaqaalaha dugsiga ama wakiilka aaminsanyahay in xaalada ay jirto taasoo u keento halis dhab ah fayo qabka ardayga, shaqaalahaas ama wakiilka waa inay ogeysiiyaan waalidka ama masuulka sharciga iyadoon laga daahin. Warbixinta la isu keeno ee wareysiga ama kulamada la talinta waxaa laga yaabaa in lala wadaago maamulaha ama shaqaalaha kale ee dugsiga sida xaaladu u baahato. Warbixinta la xiriirto isticmaalka ardayga ee daroogada ama alkulada waxaa lagu wargelinayaa waalidka (waaladiinta). Sharciga gobolka ayaa u baahan in warbixinta soo jeedineyso xadgudubka canuga in lagu wargeliyo wakaalada dowlada ku haboon (Xeerka Utah §53G-9-209).

**Adeegyada Gaarsiinta Onleenka:** Daruufaha qaar waxay u baahan kartaa in adeegyada lagu bixiyo onleenka. Adeegyada lagu gaarsiiyo onleenka si dabiici ah ayay ugu ammaan yartahay oo ay qarsoodi yar uga tahay adeegyada qof ahaanta.

- Inta lagu jiro adeegyada qof ku qofka, adiga ama qof kale ee qoyska ah ayaa laga yaabaa inuu u kuur galo kulanka (kulamada), iyagoo arkayo ama maqlayo warbixinta ee loogu tallogalay inay qarsoodi ahaato.
- Inta lagu jiro adeegyada onleenka ee kooxda yar, adiga ama qof kale ee qoyska ah ayaa laga yaabaa inuu u kuur galo kulanka (kulamada), iyagoo arkayo ama maqlayo warbixinta ku saabsan ardayga ama dad kale ee loogu tallogalay inay qarsoodi ahaato. Shaqsiyaadka jooga goobaha kale ayaa haddii kale arki kara ama maqli kara warbixinta ku saabsan ardaygaaga ee loogu tallogalay inay qarsoodi ahaato.

Waaladiinta jeclaan lahaa warbixin dheeraad ah ayaa la xiriiri kara maamulaha dugsiga midkood ka hor ama kadib markii adeega la bixiyo.

Waxaan ogolaaday in canugeyga ka qeybqaato kulamada la talinta oo waan ka dhaafay muddada sugitaanka labada isbuuc si markaas adeegyadaas ay markiiba u bilowdaan. Haddii baahiyo soo baxdo, canugeyga wuxuu ka hadli karaa arimaha kor lagu qeexay inta lagu jiro xaalada helitaanka adeegyada la talinta.

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Mafaca Qoran ee Waalidka/Masuulka** | | **Taariiqda** | |
| **Saxiixa Waalidka/Masuulka** | | **Xiriirka kala dhaxeeyo Ardayga** | |

Haddii aad u baahato warbixin dheeraad ah, ama aad qabtid su'aalo ama walaacyo, fadlan soo wac:

______________________________ Magaca, Ciwaanka

____________________ Taleefonka #